

CHILDREN'S MINNESOTA

Isu-diyaarinta Qalliinka

Waxaa ballan qalliin ah ilmahaaga loogu sameeyey Children's Minnesota. Fadlan si taxaddar leh u akhriso macluumaadka hoos ku qoran oo ku saabsan sida aad ilmaha ugu soo diyaarineyso qalliinka si aad u raacdo qorshaha.

Taleefan ayaa lagu soo diri doono qalliinka ka hor

Kalkaaliye u shaqeeya Children's Minnesota ayaa taleefan kuu soo diraya laba ilaa afar maalmood ka hor qalliinka:

- Waxaa la qiimeyn doonaa caafimaadka ilmaha.
- Waxaa lagu sheegi doonaa wakhtiga aad imaan doontaan iyo meelaha baarkinka ah.
- Waxaa tilmaamo gaar ah lagaa siin doonaa qalliinka ka hor markaad ilmaha ka joojineyso cuntada iyo cabitaanka.

Waxyaabaha lagaa rabo

Waa in aad soo sameyso shan waxyaabood ka hor qalliinka ilmaha haddii kale ballanta ayaa dibudhac ku imaan karaa ama waa laga baajin doonaa:

- ❑ **Wiisiteynta qalliinka ka hor:** Ballanta wiisiteynta qalliinka ka hor uga qabo kilinigga 612-813-7474 ama dhakhtarka aad u geyso oo waa in aysan noqon 30 maalmood qalliinka ka hor.
- ❑ **Caddeymaha dhakhaatiirta takhasuska (haddii ay idin khuseyso):** Haddii ilmahaagu la kulmo dhakhtar takhasus ah (tusaale ahaan wadnaha, sokorowga, iwm.), waa in aad la xiriirto oo aad weydiiso caddeymo gaar ah in qalliinka awgiis loo baahan yahay.
- ❑ **Diwaangelinta Bukaanka:** Soo buuxi waraaqaha diwaangelinta oo dhan oo iska soo hubso in uu shaqeynayo ceymiska ilmaha.
- ❑ **Joogitaanka iyo oggolaanshaha waalidka/masuulka:** Waa in ay qorshaha idiinku jirto ugu yaraan in uu hal waalid ama masuul u joogo qalliinka. Waa in aad soo qaadataan caddeymaha waalidnimada (haddii ay idin khuseyso).
- ❑ **Joojinta Cuntada:** Waa in aad si sax ah u raacdo sida laguugu sheego marka aad ilmaha ka joojineyso cuntada iyo cabitaanka.

Tasiilaadyo

Waxyaabaha aad soo qaadan kartaan iyo tasiilaadyo kale oo ah sida la isugu soo diyaarinayo qalliinka ka eego childrensMN.org/planningforsurgery ama sawiro QR.



Qorsheynta waxyaabaha qalliinka la iska rabo (Bogga 1 ee 3)

Halkan ka akhriso qaar ka mid ah waxyaabaha aad qalliinka ka hor u sameyneyso ilmaha.

Isla marka loo sameeyo ballanta qalliinka

- **Ballanta wiisiteynta qalliinka ka hor** uga qabo kilinigga 612-813-7474 ama dhakhtarka aad u geyso. Ballantu waa in aysan ka hor marin 30 maalmood taariikhda qalliinka.
 - U sheeg dhakhtarka ilmaha in fakis ahaan loogu diro Children's Minnesota "Foomka Wiisiteynta iyo Baarista" ugu yaraan laba maalmood ka hor qalliinka. Fakis: 612-813-7704
- **Haddii aad ilmahaaga u geyso dhakhaatiir ah takhasus gaar ah** (tusaale ahaan, wadnaha, neefsashada, hoormoonka, cilladaha dhiigga), fadlan kula xiriir taleefan ahaan oo u sheeg in ilmahaagu leeyahay ballan ah qalliin. Ka codso wixii ah waraaqo ama dalabaad oo aad iyaga uga baahan karto.
 - Waraaqaha booqashadii takhasuska ee ilmahaaga ugu dambeysey waa in loo soo diro Children's Minnesota.
 - Fadlan ka codso dhakhtar kasta (dhakhaatiirta) inay wixii waraaqo ah fakis ahaan ugu diraan Children's Minnesota **ugu yaraan laba maalmood ka hor qalliinka**. Waxay ku soo diri karaan fakiska 612-813-7704.
- **Soo buuxi waraaqaha diiwaangelinta. Iska soo hubso in uu shaqeynayo ceymiska ilmaha.** Soo garaac 612-813-7900 ama iska soo diiwaangeli barta [childrensmn.org/Applications/PreRegistration](https://www.childrensmn.org/Applications/PreRegistration)
- **Ugu yaraan hal waalid/masuulka sharciga ah waa in uu la joogo maalinta qalliinka.**
 - Haddii ilmuhu gaaray ama ka weyn yahay 18 jir oo uusan saxiixan karin oggolaanshaha qalliinka, waa inay waalidku keenaan caddeyn ah waalidnimo si ay ilmaha ugu saxiixaan oggolaanshaha qalliinka.

- Haddii ilmuhu ku nool yahay guryaha qoys koriya carruurta, waa in la soo caddeeyo qofka bixinaya oggolaanshaha qalliinka ee maalinta qalliinka (tusaale ahaan, adeege bulsho, waalidkii dhalay). Waraaqaha qoyska ilmaha koriya waa in boostada intarnetka loogu soo gudbiyo Children's Minnesota Health Information Management (Maamulka Macluumaadka Caafimaadka ama HIM) cinwaanka HIM@childrensmn.org ama waa in lagu soo diro fakiska 612-813-7704.

Muhiim: Oggolaanshaha qalliinka wuu ka duwan yahay oggolaanshaha caafimaadka guud. Qalliin laguma sameyn karo ilmaha haddii aan oggolaanshaha si sax ah loo helin.

- **Fasax ka soo qaata shaqada iyo xannaanada carruurta/iskuulka.** Qorsheyso ugu yaraan maalin barkeed haddii qalliinku yahay midka ah maalinlaha (markaan ilmaha habeen lagu sii hayn doonin isbitaalka). Ku soo talagal wakhti dheeraad ah in qalliinka awgiis loogu baahan karo. Qorsheyso wixii wakhti sookabasho ah guriga ee uu ilmuhu u baahan karo qalitaanka ka dib. Waxaa lagu soo sheegi doonaa wakhtiga qalliinka marka uu kalkaaliye kaala soo hadlo Children's Minnesota laba ilaa afar maalmood ka hor qalliinka.

Wakhtiga qalliinka waxa uu is beddeli karaa ilaa iyo fiidka ka horreeya qalliinka. Laba ilaa afar maalmood ka hor qalliinka ilmaha ayaa taleefanka lagu soo diri doonaa. Xarunta Qiimeynta Qalliinka Ka-hor waxay furan tahay 8da subaxnimo ilaa 5 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha taleefanka 612-813-7010. Farriin ah talooyin cod ah ayaa lagu duubayaa haddii aad taleefanka qaban weydo.

- **Diyaarso dad kuu haya carruurta kale/guriga iyo xayawaan haddii aad haysato.** Shuruudaha booqashada ee qeybta qalliinka Children's Minnesota waxay oggol yihiin laba qof oo qaangaaray maalinta qalliinka balse ma oggola walaalo ama carruur kale. Shuruudaha booqashada ku soo akhriso barta [childrensmn.org](https://www.childrensmn.org). Hal qof oo qaangaar ah waa inuu isbitaalka xaadir ku yahay inta uu ilmuhu joogo.

Liiska waxyaabaha la iska rabo ee qalliinka, waa socotaa (Bogga 2 ee 3)

Toddobaadka ka horreeya qalliinka

Kalkaaliye u shaqeeya Children's Minnesota ayaa taleefan kuu soo diraya laba ilaa afar maalmood ka hor qalliinka. Kalkaaliyuhu waxa uu sameyn doonaa qiimeyn ah caafimaadka, oo waxaad ka heli doontaa macluumaad ah wakhtiga aad imaaneystaan, baarkinka, qalliinka ka hor markaad ilmaha ka joojineyso cuntada iyo cabitaanka, iyo jawaabaha su'aalahaaga.

- **Haddii ilmuhu xanuunsado ka hor maalinta qalliinka**, fadlan taleefan u soo dir Xarunta Qiimeynta Qalliinka Ka-hor 612-813-7010. Kalkaaliye caafimaad ayaa qiimeyn doonta haddii ilmuhu geli karo qalliinka ama waxaa ilmaha lagu wiisiteyn doonaa kilinigga qalliinka ka-hor si loo qiimeeyo.
- **Haddii ilmahaagu qaato daawada GLP-1**, fadlan jooji isticmaalkeeda hal toddobaad ka hor qalliinka. Daawooyinkaas waxay yareynayaan faaruqinta caloosha, oo ah wax kordhin kara khatar iyo dhibaato inta lagu jiro suuxdinta. U sheeg dhakhtarka qalliinka iyo dhakhtarka suuxinta haddii ilmuhu daawo qaato. Tusaaleyaasha daawooyinka GLP-1 waxaa ka mid ah Ozempic, Wegovy, Rybelsus, Mounjaro, Zepbound, Victoza, Saxenda, Trulicity, Byetta iyo Adlyxin.
- **Waa in aadan ballanta ka soo daahin maalinta qalliinka**. SWakhti dheeraad ah ugu soo talagal ciriirka jidka, cimilada, baarkinka iyo is-xaadirinta. Booqo childrensMN.org/your-visit/getting-here jidadka la soo qaadanayo iyo baarkinka. Isbitaalka lama xiro si kasta oo ay cimiladu u xun tahay.

Maalinta ka horreysa qalliinka

Haddii lagu soo diri waayo taleefanka kalkaaliyaha Children's Minnesota laba ilaa afar maalmood ka hor qalliinka, fadlan nagala soo xiriir 612-813-7010.

Kalkaalisada ayaa kuu sheegi doonta wakhtiyada aad ilmaha ka joojineyso cuntada iyo cabitaanka.

_____ ka jooji cuntada caadiga ah

_____ ka jooji caanaha/formula

_____ ka jooji nuujinta

_____ ka jooji cabitaanka khafiifka ah (biyo, Pedialyte)

- **Waa in aad joogtaan goobta ballanta wakhtiga la idin sugayo** sidii ay kalkaalisadu idiinku sheegtay markii lagu soo diray taleefankii qalliinka ka hor.
- **Haddii ilmuhu xanuunsado**, ka hor maalinta qalliinka, fadlan taleefan ugu soo sheeg Xarunta Qiimeynta Qalliinka Ka-hor 612-813-7010.
- **U soo qubee ilmaha oo u dhaq dharka, gogosha sariirta iyo bustaha.**
 - Si loo yareeyo khatarta infakshanka, waa inaad ilmaha u sii qubeyso fiidkii ama ka hor subaxa qalliinka. Haddii aad u sii qubeyso fiidkii, waa inaad ku seexiso dharka jifka oo dhaqan, gogosha iyo bustaha oo dhaqan. Maalinta qalliinka, waa in aad u soo xirto dhar aad dhaqday oo nadiif ah.
 - Haddii uu dhakhtarka qalliinka kaala hadlay isticmaalid ah saabuun gaar ah, fadlan raac waxa dhakhtarku kuu sheegay.
- **Habeenkii diyaarso waxii aad rabto, gaariga ilmaha lagu riixdo, iyo alaabta ciyaarta.** Waalidka/masuulka habeenkii seexanaya isbitaalka ha soo qaato dhar, agabka nadaafadda (caday, alaabta qubeyska, iwm.). Waalidku haddii ay rabaan waxa ay soo qaadan karaan barkin.
- **Iska hubso goobta qalliinka iyo wakhtiga aad imaaneystaan.** Fadlan ogow wakhtiga ku qoran kadinka MyChildren's waa wakhtiga qalliinka, ee ma aha wakhtiga aad imaaneystaan.
- **Diyaarso gaadiidka idin keenaya** Goobta Qalliinka ee Children's Minnesota.
- **Ha u soo xirin** ilmaha silsilad ama wax la mid ah oo lama oggola rinjiga ciddiyaha.

Liiska waxyaabaha la iska rabo ee qalliinka, waa socotaa (Bogga 3 ee 3)

Maalinta la qalayo

□ **Haddii ilmuhu xanuunsado** maalinta qalliinka, fadlan taleefan u soo dir xarunta qalliinka ee Children's Minnesota.

- o **Minneapolis:** 612-813-7373
- o **St. Paul:** 651-220-8520
- o **Minnetonka:** 952-930-8600

□ **Waxa la soo qaadanayo**

- o Dadka qaangaarka ah ee ku soo raacaya waa in ay wataan leysanka darawalka ama aqoonsi sawir leh.
- o Kaarka ceymiska caafimaadka ilmaha/bukaanka.
- o Koobbi ah dukumiinti lagaa sugaayey oo aadan weli u keenin Children's Minnesota, sida waraaqaha wiisiteynta ee qalliinka ka hor, oggolaanshaha takhasuska iyo caddeynta maxkamadeed ee masuulka.
- o Liiska daawooyinka ilmuhu qaato (waxaa fiican in aad daawooyinka soo qaadata) iyo wixii ah qalab caafimaad oo guriga idiin yaalla oo ilmuhu u baahan yahay (sida BiPap, qalabka neefsashada, iwm.).

□ **Raac talooyinka wakhtiyada joojinta cuntada iyo cabitaanka** haddii kale qalliinka ilmaha ayaa dib loo dhigi karaa ama waa laga joojin karaa.

□ **Wakhtiga aad imaanaysaan.** Wakhti dheeraad ah ugu soo talagal ciriirka jidka, cimilada, baarkinka iyo is-xaadirinta. Isbitaalka lama xiro si kasta oo ay cimiladu u xun tahay. Waa inaad iska xaadiriso Xarunta Soodhaweynta markaad soo gashaan Children's Minnesota. Shaqaalaha ayaa markaas idin geyn doona Xarunta Qalliinka.

- o Miisaska is-xaadirinta ee qalliinka waxaa la joogaa 6da aroornimo Minneapolis iyo St. Paul, iyo 6:30 aroornimo Minnetonka.

□ **Markaad soo gashaan, fadlan iska xaadiri:**

- o **Minneapolis:** Aad dabaqa 2aad Xarunta Soodhaweynta. Meeshaas ka dib, waxaa la idin geyn doonaa Xarunta Qalliinka.
 - Miiska Xarunta Qalliinka waxaa la joogaa 6da aroornimo.
- o **St. Paul:** Aad dabaqa 2aad Xarunta Soodhaweynta. Meeshaas ka dib, waxaa la idin geyn doonaa Xarunta Qalliinka.
 - Miiska Xarunta Qalliinka waxaa la joogaa 6da aroornimo.
- o **Minnetonka:** Aad miiska Xarunta Qalliinka.
 - Miiska Xarunta Qalliinka waxaa la joogaa 6:30 aroornimo.

Su'aalo?

Wixii su'aalo ah, fadlan soo garaac 612-813-7010.

